

Xeerarka qiyamka aasaasiga ah iyo sharciga dugsiyada

- Dhammaan dadka jooga dugsigan waa inay fuliyaan qiyamka aasaasiga ah ee lagu sheegay sharciyada dugsiyada iyo manhajka wax barasho iyo in si cad looga fogaado waxa sharciga ka hor imaanaya. (Xeerka lambarkiisu yahay 11).

Taasina macnaheedu waxaa weeye in dugsigu uu ku shaqaynaayo qiyamka dimoqraadiyadda, taasoo ay sharci dejinta Iswiidhan ku nasato.

- Cutubka 8 aad ee xeerka bah dilka (2008:567) waxaa ku yaalla shuruuddo higsigiisu yahay in laga hor tago bah dilidda iyo in dhanka kalana laga shaqeeyo in sinnaan isku mid ah iyo suurto gallo isku mid ah la helo goobaha wax barashada qofku nin iyo naag wuxuu doono ha noqdee, aqoonsiyada kuwa jinsiga baddasha ama dareen cabbirka qofka, ama sinjiga uu ka soo jeedo, diinta uu aaminsanyah ama wax kale oo uu aaminsanyahay, qaabka uu u galmoodo ama da'da. Xeerka (2014:960)

Taasina macnaheeda waxaa weeye dhammaan gabdhaha, wiilasha iyo haweenka iyo ragga waxay dhan ahaantii wada leeyihiin xuquuq isku mid ah iyo qiyam isku kid ah nin iyo naag kuu doonaba ha noqdee, aqoonsiyada kuwa jinsiga baddasha ama dareen cabbirka qofka, ama sinjiga uu ka soo jeedo, diinta uu aaminsanyah ama wax kale oo uu aaminsanyahay, naafo hadduu yahay, qaabka uu u galmoodo ama da'da uu jiro.

- Xeerka 6 aad wax barashada waaxo ka mid ah dugsiga ama waaxaha xannaanada ee uu maamulaha guud uusan noqon qof aan firqo ahayn (firqo ahayn = waa in aysan imaan inuu xubin ka yahay firqo diimeed)

Dhammaan dugsiyadeenna ay degmooyinku leeyihiin waxaa hoggaamiyada maamul guud (degmada Hedemora) taasina macnaheedu waxaa weeye inaysan imaan karin inuu xubin ka noqdo firqo diimeed. Sida ku cad xeerarka xidhitaanka dugsigu wuxuu ka dhici doonaa kaniisadda, laakiin taasi macnaheedu ma ahan in lagu tukanaayo ama lagu cibaadeeysanaayo iyo wixii la mid ah.

- Haddii lala kulmo bah dilid ama lagula dhaqmo sharaf ridid waa in qofku sida ugu dhaqsaha badan ugu ashtakeeyo madaxa xannaanada ama maamulka dugsiga.

Taasina macnaheedu waxaa weeye madaxa xannaanada ama maamulaha waa inuu si dhaqso ah xaqiiqo raadin ugu sameeyaa uguna sii gudbiyaa ashtakada madaxa ugu sarreeya (Guddiga wax barashada degmada)

- **Dugsi kastaa wuxuu leeyahay xeerar kala danbeyn ah, taas oo si wada jir ah ardeyga looga wada shaqeeyo sannadkiiba hal mar. Maamulaha qofka go'aanka ka gaadhaya xeerarka kala danbeeynta.**
- Xeerka 6 aad maamulaha iyo macalinka waa inay ka qaataan tallaabooyinka isla markaas iyo ku meel gaarka ah cabashadii la soo gaarsiiyay, si loo xaqiijiyo xasiloonaada ardeyga iyo degenaanshihiisa wax barasho ama si loo gaadho in la saxo haddii uu ardey la yimaado wax qas ah. (xeerka dugsiyada). **Taasina macnaheedu waxaa weeye in ardeyga kaga saarayo dhismaha dugsiga, haddi wax sheey ah oo la qubay, ardeyga waxaa loo soo diri karaa gurigooda kadib markii waalidkiis lala soo xiriirto ama xaqiiqo raadinta kadib, waxaa si ku meel gaar ah loogu meelayn karaa dugsi kale.**

- **Sida ku cad xeerka dugsiyada waa in dugsiga iyo gurigu ay ka wada shaqeeyaan wanaagga ardeyga. Dugsigu waa in uu dhageeystaa waalidka, laakiin dugsigu kama baaqsan karo haddii ay timaaddo xeerka dugsiyada iyo manhajka iyo murarrka wax barasho ee la higsanaayo. Waxaase jiri kara sababo gaar ah oo quseeya haddii ardeygu uu naafo caqliyan ah yahay.**
- **Dhammaan qoraalka la madoobeeyay ee haddana la jifjiifiyay waa qeexid ah xeerka dugsiyada iyo manhajka.**